# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 2aad fadhigii 16aad*

***Wakhtiga uu Furma: -*** 09:47 AM
***Taariikhda: - Salaasa 18 January 2022***

**Gudoonka: -** Mudane, Cabdirisaaq Khaliid Axmed

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga: -**

- Doodda Xeerka ka-hortaga iyo Xakamaynta ka-ganacsiga Tahriibinta Dadka.

**Gudoomiye Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed: -** Mudanayaal waxaa inoo diyaar Xaarkii ka-hortaga iyo Xakamaynta kaganacsiga iyo Tahriibinta sidii aynu hore ugu balansanayn waxaan bilaabaynaa Dooda Xeerka waxaanan ku soo dhaweynayaa oo aan ugu horaysiinaya;

**Md. Eng. Xirsi Cabdilaahi Xirsi (6min, 01sec):-**Waxaan ku bilaabi doonaa soo jeedintii ay Guddidu soo jeedisay oo aan dhawr Qodob ka soo qaadan doono, ka dib waxaan u gudbi doonaa xeerka oo aan waxyaabo yar yar ku soo daray.

**Qodobka 7aad** Guddidu waxay ku dartay farqad. Anigu shaqsiyan waxaan soo jeedinayaa in farqadaas in laga saaro, maadaama oo ay Guddidu ku dartay ganaax lacageed, halka markii hore ganaaxu uu ka ahaa xadhiguun. Guddidu waxay ku dartay 10,000,000 SL.SH. *Waxaan soo jeedinayaa in farqadaas laga saaro.*

Waxaan ku sababaynayaa halkan xeerka qaybihiisa dambe wuxuu odhan doonaa, qofka lagu helo dembiga tahriibinta waxa lala wareegayaa Hantidii soo gashay qofkan tahriibiyaha ah. Kol haddii Hantidiisii lala wareegayo, ma jirto sabab lacag saa'id ah looga qaado, markaa waxaan ku daynayaa tii hore ee ahayd xahdiga, waxaanan soo jeedinayaa in qodobkaas farqadaas laga saaro.

**Qodobka 8aad** ee soo jeedinta Guddida. Waan ku raacsanahay oo waan second garaynayaa.

**Qodobka 9aad** soo jeedinta Guddida, iyadda waan ka saarayaa, waxaanay ku dareen lacag dhan 15,000,000, iyaddoo sidaan xagga hore ku soo sheegay lala wareegi doono Hantida oo dhan.

**Qodobka 10aad** soo jeedinta Guddida waan ku raacay, oo waa in loo raacaa xeer Lr/75/2016

**Qodobka 11aad** Guddidu siday ugu dartay, iyaddana waxaan soo jeedinayaa in laga saaro, waxaanay ku xuseen xaddi lacageed ayey ku xuseen.

**Qodobka 13aad** Guddidu waxay ku dareen laba farqadood oo kala **farqada 4aad** iyo **farqada 6aad. Farqada 4aad** ee Guddidu raacisay **Qodobka 13aad**, waxay tahay in loo soo wareejiyo **Qodobka 12aad,** maxaa yeelay qodobka 12aad waa caawinta iyo gacanta siinta tahriibiyayaasha dadka, waan in aynu farqadaa ku wareejin qodobka 12aad.

**Qodobka 13aad farqada 5aad** ee ay ku dareen waxay odhanaysaa, *"Haddii gaadhiga uu wato tahriibiyuhu ay leedahay dawladu ama ay leedahay hay'addaha amaanku, waxa loo wareejinayaa Hay'ada kale oo amaan"*. Taasi wax macno ah oo ay leedahay in gaadhi ay leedahay hay'ad amaan loo wareejiyo hay'ad kale oo amaan", haddii Police la siiyo wax macno oo ay samaynaysaa ma jirto, markaa waxaan soo jeedinayaa in farqadaas meesha laga saaro.

**Qodobka 18aad** waxa uu odhanayaa; "in la ganaaxo qofkii sheegi waaya xog" waxaan ku daray sidoo kale in abaal-marin la siiyo qofkii xogta keena. Haddii la ganaaxo qofkii xogta sheegi waaya, waxa isna fiican in la abaalmariyo qofkii xogta sheega. Waxaan ku soo daray **farqad 2aad** oo odhanaysaa; ***"Waa in abaalmarin la siiyaa qof kasta oo keena xog, taasi oo ka hortagta tahriibinta dadka ama caawiya in la helo tahriibiyayaa"*** abaalmarintu la siinayaa waxay u dhigmi doontaa xogta uu keeno.

**Qodobka 21aad** ee xeerka farqada 1aad xarafka "E" waxay u qoran tahay, "isagoo xushmaynaya Xuquuqda aadamaha uu adeegsado xeelad kasta oo baadhis ah" halka "**xushmayn**", waxaan ku beddelay "**Ilaalinaya"** marnaba looma ogola qof dembi baadhaha ah inuu ku xad-gudbo xuquuqaha aadamaha.

Waxaynu taa u ilaalinaynaa in aanay ciidamadu marna aanay samayn wax xad-gudub ah, looma ogola qof bani-aadam ah in lagu jidh jidilo jeelasheena. Kalmada xushmayn waxaanu u beddelay isagoo ilaalinaya ama ku dhaqmaya. Maaha in marnaba askari loo ogolaado inuu sameeyo jidh dil.

**Qodobka 22aad farqadiisa 2aad** waxaan ku darayaa **"haddii ay keento dhimasho lagama reebi karo ciqaabta**" oo haddii tariibuhu qofka tahriibaya uu ku keeno dhimasho toos ah, maadaama oo xadka Islaamku uu yahay qisaas, qisaastaas lagama saari karo meesha. Markaa waa in halkaa si toos ah loogu caddeeya in aan la dhimmi Karin ciqaabtaas.

Waxaan ku soo gebo-gabaynayaa hal qodob oo aan ku soo daray xeerka, qodobkaasi oo noqon doona **Qaybta 6aad** oo ka hadli doona "***Wasaarada Arrimaha Dibeddu iyada oo adeegsanaysa Hay'adaha amaanka iyo Hay'adaha caalamiga ah, waa inay ka hawl-gashaa in si dhakhso ah loo soo daayo, qof kasta oo reer Somaliland ah oo loo haysto tahriib".*** Xeerku waxa uu ka hadlayaa Gudaha, laakiin dadkeena faraha badan ee Libiya lagu haysto dawladu si toos ah ha uga hawl-gasho, iyadda oo loo marayo Wasaarada Arrimaha Dibedda.

**Md. Axmed Cabdi Ibraahin (Timo-jilic)** **(5min, 23sec):-** Bislimaali Raxmaani Raxiim. Gudoomiyaha, Mudanayaasha iyo saxaafada Aslaamu Calaykum Warax Matulaahiu Wa Barakaatu.

Ka hortagu waxa uu ka mid yahay daaweynta dhabta ah ee mushkiladi leedahay, sidoo kalena si looga guulaysto dhibaatada taagan ee tahriibka, anigu waxaan soo jeedinayaa "waa in sirdoonla qaranku hawl-galiyaan oo ay si toos ah ula shaqeeyaan laba xubnood oo jaamacadaha, laba xubnood oo dugsiyada sare ah oo wiil iyo gabadh ah, iyagoo u kuurgala, waxay ogaadaana sirdoonka soo siiyaan dhalinyaro kasta oo maleegaysa, ka hawl-galaysa inay sameeyaan qorshe tahriiba, si ay arrintaasi u noqoto ka hortag. Qof kasta oo muwaadin ah oo ka qaybgala joojinta tahriibka oo ka imanaya Gobolada sida Ceerigaabo ama Burco oo galbeed u socda, marka ay marayaan wajaale lagu wargeliyo.

**Qodobka 7aad** waxaan ku daray **farqada 7aad** oo u dhigan "**Qofka ajanbiga ah ee dembigan lagu helo, waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan farqada 5aad ee qodobka 7aad iyo ganaax lacageed oo dhan 10,000 kun USD. Waxaan soo jedinayaa in farqdaa lagu darro.**

**Qodobka 9aad** ganaaxa ku xusan isla xeerka qodobadiisa 2aad, 9aad oo 15,000,000 oo ganaaxa qofka muwaadinka ah. 15000 UDM waxaan kun daray qofka aajanibka ah ee hawshaa inaga dhex bilaabay.

**Qodobka 11aad farqada 2aad** oo Guddida ku soo dareen waxa la soo jeediyay in lagu sii daro **"Muwaadinka waana in lagu caddeeyaa maxkamad horteeda inuu si badheedha uga qaybqaatay falka".**

**Qaybta 3aad ee Qodobka 13aad Farqada 5aad** Haddii gaadhiga lagu galay falkan uu yahay gaadhi ay leeyihiin ciidamada amaanka ama hay'adaha kala duwan ee dawladda, waxa loo wareejinayaa hay'ad kale oo dawladeed ama ciidanka kale ee Qaranka ee aan ahayn kuwo leh, marka falka lagu galay. Waxaan ku daray **"cidda falka ku gashayna weaxay mutaysanaysaa xeer ciqaabeedka Qodobka 9aad Xaraf 'B".**

**Qodobka 26aad farqadiisa 14aad** Habka ciqaabta oo muwaadiniintra taabanayaa, haddii muwaadiniinta qaar dood ka keenaan ay inayan sax tahay.

Waxaan ku soo gebo-gabaynayaa mudane Guddoomiye aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin.

**Md. Cabdinaasir Yuusuf Cismaan (Qodax)** **(6min 10sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal Asc, ugu horayn waxaan u mahadnaqayaa oo aan bogaadin u jeedinayaa Guddida Arrimaha Gudaha oo isku hawshay wakhti badana galisay oo soo jeedimo macquul ahna inoo soo gudbisay, mudane Gudoomiye xeerkan oo ah xeer aad loogu baahnaa oo sida aad ogtihiin dalkeena xaaladihii ugu danbeeyay iyo dadka ka ganacsadaa xaalada ay ku jiraan, markaa waxaan wax ka beddelilahaa ama soojeedin ku samayn lahaa, aniga oo ka bilaabaya soo jeedimaha Guddida **Qodobada 7aad farqada 6aad, Qodobka 11aad, Qodobka 15aad farqadiisa 1aad iyo 2aad, Qodobka 19aad farqada 2aad**, qodobadaa ayaan ku samaynayaa soo jeedimo aniga oo wax badan la qaba mudanihii iga horeeyay ee Xirs oo runtii aad moodid in aanu meelaha qaar isku aragti ka nahay.

**Qodobka 7aad farqadiisa 6aad** oo u dhigan; qof kasta oo lagu helo inuu gaystay fal dambiyeed lidi ku ah qodobkan waxa lagu ciqaabaya ciqaabta ku xusan faqrada 5aad ee qodobka 7aad iyo Ganaax lacageed oo dhan 10 milyan oo SL SH AH. *Sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in ganaaxa oo kali ah lagu daayo oo laga saaro lacagta ganaaxa ah Meesha ku qoran*

**Qodobka 11aad farqadiisa 2aad** ee u dhigan; waxa lagu ganaaxaya qof kasta oo u u uku dhaco xukun gacan siin tahriibin dad xadhig ciqaabeedka ku xusan faqrada 1aad ee qodobka 11aad iyo ganaax dhan $3000(sadex kun oo dollar). *Iyadana waxaan soo jeedinayaa in lacagta ganaaxa ah laha saaro maadaamo oo aynaan garanayn lacagtaasi Meesha ay marayso ama ay ku dhacayso oo ciqaabta oo kali ah lagu ekaado.*

**Qodonka 15aad farqadihiisa 2aad iyo 3aad** oo u dhigan sida; dhaawacyada soo gaadha dhibanaha waxa la waafajinaya sida ay qabto shareecada islaamku, oo ah in la xaqo qofka dhaawacu soo gaadhay iyo qodobka 440 ee XCG qaybihiisa kala

duwan ee la xidhiidha dhaawacyada hadii uu fudud yahay ama uu culus yahay. *Farqadaaa waxaan soo jeedinayaa maadaama oo aynu nahayd dadd islaam ah in qofkaa dhibku soo gaadhay anynu u raacno qaanuunka islaamka oo kali ah oo xeerkaa ciqaabta ah ee Meesha quran laga saaro ayaan soo jeedinayaa*

Falku hadii uu dhimasho sababo waxa loo raacaya si waafaqsan Qodobka 434[aad] ee Xeerka Ciqaabta Guud, ciqaabtiisuna waa dil. *Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in farqadana lagu ekaado diinta islaamku wixii ay ka qabto*

**Qodobka 19[aad] xarafkiisa "T"** oo u dhigan sidan; Ganaax lacageed oo dhan ($15, 0000) *Iyana waxaan soo jeedinayaa in laga saaro ganaaxaa lacageed.*

Guud ahaan mudane Gudoomiye inahaa weeyi intii aan ka soo akhriyay Xeerka, hasayeeshee waxaan ku darayaa laba soo jeedimood, waxaan soo jeedinayaa in xeerka ciqaabta guud oo ah xeer ilaa wakhtigii soomalia lagu dhaqmayay in xeerkaa aan sida ugu dhakhsaha badan loo sameeyo waad mahadsantihiin.

**Md. Cabdilaahi Yuusuf Axmed (5min, 04sec):-** Mudane Guddoomiye iyo mudanayaasha kale ee golaha wakiiladda waxaan idinku salamaya salaanta islaamka Asalaamu calaykum waraxmatu laahi wabarakatu ugu horayn meelo badana waxaan ku taageersanahay mudanayashiii iga horeeyey ayaa taataabtay, waxaanse ku kaabaya laba erey oo soojeedin ah:-

**E**reyga kowaad madaama aan dal islaama nahay oo Dastuurkeenana ay saldhig u tahay shareecada islaamku wixii ka hor imanayana aan dalka laga dhaqan galinanyn ama uu yahay waxba kama jiraan; waxaan *soojeedin lahaa mudane guddoomiye in xerarka dhaqangalka ah ee jira iyo kuwa hada inaga baxaya aynu gudiga shareecada ee Golaha Wakiiladda aynu insha u dhiibno inta ayna Goleweynaha lageyn si looga saaro wixii diinta ka Horimanaya.*

Xeerkan markaan akhriyey waxyaabo badan oo ganaaxyo ah ayaa ku jira, Xeer hore oo aanu haynay oo ahaa xeerka caymiska Qaranka, waxaanu iskugu yeedhnay culimada waaweyn ee dalka, iyada oo ay culimadaasi isla waafaqeen wax allaale wixii ganaaxa ee qasaba inuu shareecada islaamka ka hor imanayo.

Waxaan soojedin laha kuwa iminka ina horyaala ee kan aan maanta ka doodaynaa kamid yahay wax allaale wixii khasaba ee ganaaxa ee lacag sheegaya in laga saaro ama siyaabo kale loo bedelo sida xarig iyo waxyaalaha la mid ka ah ee aan shareecada ka hor imaanayn.

Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa mudanayaashana kala duwan Gudiyada kala duwan xeerka aan maanta qodob shareecada ka hor imanayaa aynu ku ansixinaa boqolaalka sano ee aad mootan tahay denbigiisu waa kula socdaa marka taasna aynu ka fiirsano

xeerkasta waxaan soojeedin lahaa in aan gola weynaha la geynin ilaa lasoo mariyo gudiga culimada iyadoo dastuurkeenana jideeyey.

Sida uu Dastuurkeenu sheegay waxaa jirta Gudi culimo ah, mudo xileedkooduna yahay 5sanno oo madaxweyne kasta oo Somaliland madaxweyne ka noqdaa Aasaaso oo macnaheedu yahay inay xerarka iyo shuruucda ku ilaaliyaan shareecada islaamka taasna aynu ognahay in mudo afar sanadood ah aanay shaqaynin lana magcaabin.

Guddidaasi waxyaala badan ayay Xeerarka inaga fududyn lahaayeen sidaa awadeed waxaan u dhaafaya uun gudi culima ah baa inagula jirta Golaha oo sheikh ahmed guddoomiye kayahay, waxaan leeyahay xeerarka hore wixii aan shareecada islaamka wafaqsanayn aan dib u eegno, waxyaabaha kale ee Golaha imanaya inaga baandheeya madaama shareecada aad inooga masuultihiin idinku ka gudi ahaan gudi kasta waxaan leeyahay waa inay soo mariso xeerarka gudiga shareecada taasi waa soojeedin.

laba qodob oo kalena waxaan usoo jeedin lahaa gudiga shuruucda iyo guddiga arrimaha Gudaha sida Cabdinaasir yuusuf Qodax sheegay xeerka ciqaabta guud kal-fadhigan insha allah hala soo dedejiyo.

Qodobka kale aan raacinaya uun waa xeerka saxaafada oo isaga warbaahinta iyo qarankuba baahi weyn uqabto labadaa inaan insha allaah.

Ugu danbayntii hal midh ban ku darayaa halkaa xukun ka xadhiga waxaan odhan lahaa xukunka xadhiga waxaa iminka waxa ugu yar ee maxkamaduhu xukuman lix bilood baa u yar ban filayaa, markaa lixda bilood ilaa toban sanno oo markaa maxkamaduhu raacaan qof kasta intuu kaso galo qiimaynta uso baxda waxay noqoto markaa waxaan soojeedin lahaa ama aan ka ka dhigi lahaa lix bilood ama toban sanno

**Md. Mubaarig Xuseen Maxamed (Xeel-dheere)** **(2min 05sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal Waxaan si kooban uga hadli doonaa ama si Guud u dul marayaa Xeerkan, inaga oo wada ogsoon dhibaatada naf iyo maalba leh ee ay inagu hayso tahriibtu ama ka-Ganacsiga dadku inagu hayo, waxaa loo baahanyahay Xeer xakamaynaya kana jawaaba Duruufaha jirra aynu samayno, waxaanan filayaa in xiligiisii la taaganyahay.

Waxaad moodaa in xeerka sida loo sameeyaa ay dhib yartahay ayna adagtahay xeerka sidii loo dabaqi lahaa oo dadkeenu ay is hortaagayaan, *taas oo aan soo jeedin lahaa in xeerka ka hor uu Goluhu uu sameeyo daraasaad kooban inta aan xeerka la ansixin, hadii ay ahaan lahayd dhinaca culimada, dhinaca khabiirada xeerarka takhasuska u leh, iyo cidii kale ee la halmaashaba,* waxaa kale oo aan u mahad-celinayaa Guddida Arrimaha Gudaha ee xeerkan waxtiga badan soo galisay inoona soo gudbisay oo aan leeyahay aad ayaan u mahadsantihiin waanan ka baxay.

**Md. Sh. Siciid Maxamed Ismaaciil (Siciid Sokeeye)** **(3min 24sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabad-galyada ee Golaha Wakiilada ee ka soo shaqaysay mashruucan isaga ah waxaan leeyahay jazaakalaahu khayr.

Mashruucani waa mashruux uu Aas-aaskiisu yahay galis fal-danbiyeed oo taabanaya meelo kala duwan oo mujtameceena khuseeya, Tahriibta iyo ka-ganacsiga bini'aadmigu waa wax inagu cusub oo aynaan shuruux hore u lahay hadana inagu bilaabmay, natiijada ay leedahayna aad u culustahay, waana mashruuc koobsanaya jariimad la galay oo loo galay qof ahaan ama koox ahaan oo baayacmustari gashay oo laga faa'iidaysanayo dadka naftooda iyo jidhkooda, sidaa daraadeed waxaan u mahad naqayaa Guddida ka soo Shaqaysay, *waxaanan soo jeedinayaa* **in xeerka la siiyo wakhti intan ka badan oo aynu kaashano dadka ku shaqada leh la-dagaalanka jariimadan gaar ahaan Ciidamada Booliska, danbi-baadhayaasha, xukaamta iyo inaga oo tixraacna dadyawga inooga horeeyay arrimahan si aynu ugu soo qaadano wixii inaga anfacaya ee aan diinteena ka horimanayn sida uu Dastuurkeenu dhigayo.***Sidoo kale mudanayaashii iga horeeyay qodobadii ay ka hadleen aad iyo aad ayay u wana*

*agsanaayeen waxaanan leeyahay aad ayaad u mahadsantihiin.*

**Md. Xirsi Cabdilaahi Xirsi** *Mudanayaal soo jeedin ayaan ku daryaa, maadaama oo Mudanayaasha dooday ay aad u yaryihiin xildhibaanadii hadlayna ay guubaabo u badatay waxaan soo jeedin lahaa intayadii qodobada soo jeedisay in hadhaw codka ay soo raacaan oo madaama oo seconmnetigu uu yaraaday oo aan xeerarkii hore loo eegin waa iga codsi waad mahad santihiin.*

**Gudoomiye Cabdirisaaq khalif;** Soo jeedimahaasi waa sax waxayna soo raacayaa hadal-qoraalka si ay hadhaw u raacaan codaynta.

**Md. Maxamed Jaamac Koodbuur** **(2min 43sec):-** Mahadsanid Mudane Gudoomiye, qododkaygu waa soo-jeedin waxaa iimuuqata in xeerkani uu yahay muhiim una baahanyahay wakhti intan ka badan, *Waxaanan soo-jeedintiisa ku raacsanahay md. Siciid sokeeye.* Sidoo kale tahriibintu kaliya kuma koobna shakhsi qudha ama qof la tahriibiyay ee waxaa jirra tahriibin farro baddan oo ay ka mid tahay ka ganacsiga jidhka dadka iyada oo aanay ka muuqan xeerka ama aanan ku arag soo jeedinta guddida, *Markaa waxaan qabaa inaanay ku filnayn in mudanayaashu xeerka maalin kali ah ku soo akhristaan xeerka kuna soo diyaarsadaan doodooda aad ayay u koobantahay xeerkuna aad ayuu u balaadhanyahay;*

**Gudoomye Cabdirisaaq khalif: -** Mudane aan ku saxo, xeerkan waxaa la haystay mudo bil iyo badh mudadaana gudidu haysay mudanayaashana waa loo qaybiyay oo wey hayeen, markaa mudanihii aan helin xeerku waa mudane Meesha ka maqnaa ee dhaliil uu qofku leeyahay yaanu cid kale saarin.

**Md. Koodbuur,** Gudoomiye waa laga yaabaa waxaa la qaybiyay intii aan safarka ku maqnaa, lakiin waxaan qabaa in Xeekan samayntiisu marka la eego wakhtiga aynu maanta joogno oo ay dunida ku badatay tahriibintu in sidan si ka balaadhan xeerkan loo dhigo oo waxyaabo badan oo aan tabayo in ay ka maqan yihiin xeerkan lagu soo darro aniga oo ixtiraamaya wakhtigaa hore ee aad sheegatay in la siiyay xildhbaanada waad mahadsantahay Mudane Gudoomiye.

**Md. Saleebaan Axmed Carrab (4min 05sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, mudane Gudoomiye iyo mudanayaal anigu waxaan hayaa soo jeedin kooban, *Marka hore waxaan taageerayaa soo jeedintii Md. Cabdilaahi Yuusuf iyo Cabdinaasi qodax oo labaduba qodobadii aan niyada ku hayay qaybo ka taabtay ee ka mid ahaayeen ganaaxyada la qaadayo in ay shareecada ku haboonyihiin hadii aanay ku haboonayna loo gudbo wixii kale ee ka waajibaya jariimadaa la galayo.*

Arrintani sidaa Sh. Siciid Sheegay *waxaan ku taageersanahay in arrintani ay u baahan tahay fakar dheeraad ah oo meel kasta oo ay khusayso la taabsiiyo oo ay ugu horayso in Xukuumadu samayso baraamij weyn oo kaga talo galayso dhalinyarada iyo dhibaatada shaqo la'aanta ee jirta taas oo sababaysa tahriibka dhalinyarada.* Tusaale ahaan badeenu waa bad aad u dheer khayraad baddana ku jirro, khayraadkaas iyo dadkeenii isma hayaan, waa in la isku jeheeyo oo marka qorku uu dugsiga hoose ana sare dhameeyo waa in loo sameeyo barnaamij ku saabsan badda waxay ila tahay in dad baddani shaqo abuur ay u noqon lahayd, markaa ugu horayn waxaan leeyahay waa in uu jiraa ku talo gal waana in halkaa laga soo bilaabo.

Dhanka kale waxaan leeyahay ciqaabaha xeerka ku jira waa in *ganaaxyada laga reebaa sidii mudanihii iga horeeyay uu sheegay, sidoo kale waa in daraasaadka aynu wakhti u helaa* waad mahadsantihiin.

**Gudoomiye Abdirisaaq Khaliif Axmed: -** Mudanyaal waxaan hadalka siinayaa Axmed Guruuje oo ahaa Guduumiyaha Guddidii soo Diyaarisay Xeerka, balse inta aanan siin waxaa la ii keenay Soo-jeedin sharci oo wakhtigeedii laga soo gudbay oo ah; Xeerkani waxa uu saamayn badan ku yeelanayo xeerar hore oo jirray oo ay ka mid yihiin;

1. Xeerka Booliska

2. Xeerka Ciidanka ilaalada Xeebaha
3. Xeerka Nabad-galyada Guud iyo Anshaxa
4. Xeerka Isku wareejinta Maxaabiista
5. Xeerka Jinsiyadaha
6. Xeerka Ka-hortaga Maydhaanka lacagaha.
7. Xeerka Xawaaladaha
8. Xeera komishanka xuquuqda Aadamaha
9. Xeerka Xabsiyada iyo
10. Xeerka Habka Ciqaabta Guud

Waxaa kale oo ay iyana saamayn ku yeelanaysaa siyaasada Xukuumadu ka yeelanayso iyo habraacyada tilmaamaya qaabka looga hortagi karro maadaama oo ay arrintani tahay arrimo **social crimes** ah iyo kuwa xuduudaha ka gudba, sidaa awgeed waxaa rajaynayaa in qolada guddidu dib u eegi doonto ayaan rajaynayaaye waa in uu xeerku jideeyaa danbiyo la xaqiijiyay isla markaana lagu faah-faahiyo Ciqaabtooda iyo habka baadhistooda, oogistooda iyo ka garnaqistoodaba iyo in door laga siiyo dhamaan hay'adaha uu khuseeyo iyada oo midna wax loo dhimayn doorkeeda xeerka lagu tilmaamay.

In la eego habraacyada caalamiga ah ee danbiyada tahriibta iyo hanaaka loo xakameeyo waxaa xeerkan Aas-aas u ah in dawladu heshiiso lagasho in soo celinta eedaysanayaashu wadamada ay ku dhamaadaan ama ay sii maraan.

Anniga oo Axmed Nuur siinaya, waxaan ku celinayaa innaga oo xeerkan mudo badan haysanay waxaanad moodaa in xeerka si badan loo soo akhriyin loogana soo fal-celin, waayo waxay ka muuqataa mudanayaasha isku qoray Dooda Xeerka, waxaan jeclahay in qolada hadal qoraalku soo diyaariyaan si uu hadhaw u galo codka marka koobaad.

Sidoo kale cidii mudanayaasha haysa qoraalo ku saabsan xeerka waa in ay soo gudbiyaan waana la qabanayaa qodobada ay ka dib dheceen inta aan xeerka la isku soo gurrin xeerka, si ay codaynta u raacaan.

**Md. Cabdilaahi Muuse Cabdi** **(5min 17sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Wabihi Nastaciinu Calaa Umuuri Dunyaa Wadiin Gudoomiyaha, iyo Mudanayaasha ASC, Runtii waxaan is dul-taagi lahaa oo uu xeerkani ka hadlayaa dadka igu wax tahriibinaya, lakiin xeerku kama hadlayo qofka isagu tahriibaya, waxaanad moodaa in ay ku haboonaan lahayd qofka isagu isu dayaya in uu tahriibo iyo ka wax tahriibinayaaba in ay danbiilayaal yihiin.

Qofka mahlakadaas galaya ama jidhkiisa Qayb ka mid ah lala baxayo lagana ganacsanayo ama laba dilayo ee u badheedhaya isdilkaa waxay ahayd lafteeda in xeerkani uu wax ka yidhaahdo, ***markaa waxaan odhan lahaa halagu soo daro qodob ah; Qofka lagu qabto isaga oo doonaya in uu tahriibo wixii laga yeeli lahaa iyo ciqaabta ka dhalanaysa.***

Dhanka kale waxaad moodaa in qaab-qoraalka Xeerka meelaha Qaar wax ka qaldanyihiin; **Qodobka 2aad** ee Eraybixinta oo u dhanaya; ***Ku tagrifal xaalad nuglaansho"*** *waxa loola jeedaa ka faa'iideysiga nuglaanshaha qof aaminsan in aanu haysan dariiq kale oo aan ahayn in uu fuliyo hawsha ama waxa laga dalbay, oo ay kamid tahay balse aan ku koobnayn ka faa'iideysiga nuglaanshaha* ***Halkaas waxaad in erayga ka mid tahay iyo qoraalka inta kale aanay is qaadanayn ee waxaan leeyahay ha loo qoro si macnuhu u soo boxo loona fahmi karro.***

**Qodobka 9aad farqadiisa 1aad** ee odhanaysa; Qof kasta oo si kula kac ah, si uu u helo ama cid kale u hesho si toos, *waxaad moodaa sidii aan hore u sheegay in farqadaas 1aad loo dhigo si la fahmi karo oo la yidhaa qofkasta oo si ula kac ah uga helo faa'iido oo faa'iidada la so horaysiiyo lana soxo Ayaan soo jeedinayaa.*

**Qodobka 11aad farqadiisa 1aad** halka ugu danbaysa waxaa ku qoran; *waxana lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya shan 2 ilaa 5 sano oo xadhig ah. Halkaa waxaan odhan lahaa qoraal ahaan waa in loo saxaa.*

**Qodobka 15aad**, halka ay ku qorantahay *ka-ganacsiga* waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo *Ganacsiga.*

Mudanayaal inta aan wax eeg-eegay waa intaa oo nuxurka ugu weyni yahay qofka isagu tahriibaya maxaa laga yeelaya waad mahad Santihiin.

**Md. Axmed Yuusuf Nuur Guruuje.** Mudane Gudoomiye waadmahadsantahay, mudanayaal nidaamka aynu qaadanay ee ah isla xisaabtanka marka aynu ka duulayno Aragtida sharci ama siyaasadeed ee xukuumadu waa Xeerka, guddiduna waxay check-graysa arragtidaa xukuumada oo wixii ka dhinaa wixii itaalkeeda ah ay ku soo dartay, waajibka Gole waynaha laga doonayaana waa in guddida iyo xukuumadaba ay chech-garayso si waxa inoo soo baxayaa ay noqdaan wax shilinta laga guray, waxaanan u mahadnaqayaa dhiiri galinayaana

*Wakhtiga uu Furma:-* **09:35 AM**
***Taariikhda:- Sabt 22 January 2022***

**Gudoonka: -** Mudane, Cabdirisaaq Khaliid Axmed

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga:-**

- **Doodda Mashruuc Sharciga ka-hortaga iyo Xakamaynta kaganacsiga iyo Tahriibinta dadka Maalinta 2aad**

**Md. Axmed Cabdi Ducaale** **(1min, 15sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, xildhibaanada, Xoghaya, shaqaalaha iyo saxaafada aad ayaan idiin salaamayaa.

Xeerkan kolay, waxaan odhan lahaa xanuunka haddii aan la helin meesha uu ka yimi lama dawayn karro. Horta waxaan jeclaan lahaa in marka hore la yidhaahdo Tahriibka maxaa keenay oo ka doodno, xaqiiqeedana aynu qiimayn ka samayno.

Xeerarkan imika laga dooday lacagta ganaaxa ah ee la leeyahay ha laga saaro, Matalan waxaan odhan lahaa qofka dembiilaha ah ee Ajaanabiga ah ee la qabto xadhig iyo ganaax baan ku qoran, markaa haddii uu xadhigii dhamaysto oo ganaaxii waayo maxaa laga yaala. Halkaa gaab ayaa ku jira. **Anigu waxaan soo jeedinayaa ganaaxa ha loo qiimeeyo oo Matalan haddii uu waayo lacagta ha loogu beddelo xadhig. $10,000 ganaaxa ayaa la saaray xadhigii ayaa ka dhammaaday lacagtii ayuu waayey, markaa wax lagu beddeli karro waa in la helaa.**

Waxaan soo jeedinayaa haddii lacagtii uu waayo, ha lagu xukumo ayaan odhan lahaa 4 ilaa 5 sanno haddii uu qofkii lacagtii waayo, waana in meel lagu caddeeyaa oo qodobkii looga meesha ka maqan yahay.

**Md. Cabdikariim Meecaad Isaaq** **(1min, 38sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu. Shir-guddoonka, xildhibaanada, shaqaalaha iyo saxaafada aad ayaan idiin salaamayaa.

**Qodobka 9aad: Dembiyada Tahriibka** Waxaad aragtaa xeerarkeena mar walbka oo la samaynayo xabsigu inuu ka bilaabmayo shan sanno iyo wixii ka badan. Markaa waxaan soo jeedinayaa maadaama oo lagu qoray qof kasta oo lagu helay dembiga ah farqada 1aad " dembiga waxa lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 5 sanno ilaa 10 sanno" 5 ilaa 10sanno marka qofka lagu xukumayo, waxaan jeclaana lahaa in laga dhigo 1sanno ilaa 10 sanno, si uu xaakinku ama qofka wax xukumayaa uga bilaabo halkauu kasoo galay iyo sida uu dembiga u soo galay, iyadda oo ay kala duwanaan karto in qofku si yar oo

dadban oo kale uga soo galayo, inaguna xitaa aynaan baadhitaano rasmi ah oo lagu caddayn karro in qofkaasi dembigaa ugu jiray si toos ah.

**Qodobka 10aad: Xaaladda gaar ah iyo culaysinta ciqaabta.** Maxkanadu waxay awood u leedahay inay kordhiso ciqaabta ku xusan **Qodobka 9aad.** Haddii la soo qaato 5 ilaa 10 sanno, haddana maxkamada awood gaar ah ayaa loo sii siiyey wax aan la ansixin ama aan dastuur ahayn ama aan xeer ahayn ayaa lagu xukumayaa qofka oo xaakinku isagu ku soo kordhinayaa oo ilaa intii loo xadiday isagu oo qofka ku xukumi karro. Markaa halkaa waa in la caddeeyaa, si loo ogaado waxa uu ku kordhin karayo xaakinku.

Qaybta ku saabsan la wareegida Hantida, waa in la caddeeyaa Hantida uu ka helay Tahriibka, si loo ogaado waxa uu ka faa'iiday qofkaasi Tahriibka, lagana saaro wixii uu ka helay Tahriibka iyo wixii uu qofku hore u lahaa. Haddii la yidhaa Hantidiisa oo dhan ayaa lala wareegayaa, waa waxaynu ka dagaalanay Hantidaa lala wareegayaa sidii baabuurtii qaadka ee lala wareegi jiray, markaa arrintaasi waa arrin u baahan in si wanaagsan looga fiirsado. Wasalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

**Md. Cabdikariim Adan Dubad (9min, 22sec):-** Bismilaahi Eaxmaani Raxiim. Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu. Shir-guddoonka, xildhibaanada, shaqaalaha iyo saxaafada. Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Waxaan ku bilaabayaa magac Xeerka. Xeerka magaciisu waa balaadhan yahay, waxaanu ku soo noqno-qonayaa xeerka dhexdiisa.

Markaa si loo fahmo xeer oo u yeesho magac kooban, waxaan ku soo koobi lahaa magaciisa: ***Xeerka Tahriibka***, iyadda oo dhexdiisa lagu sheegi doono ka hortaga iyo la dagaalankuna gudaha ku jiraan.

**Qeexid:** Tahriibku waa dembi (crime) qof lagag kaxaysto halkii uu hoogay, si khiyaabo, khasab, af-duub, xoog, cabsi gelin, ama sixir iyo sifo kasta oo ay ku dhalan karto natiijo khatar ah, gelin karta jidhka, maskaxda, nafta, niyada, maalka iyo sharafta qofka, taas oo loola jeedo in lagu shaqaysto, la kireeyo xoogiisa, lagu sii wareejiyo cid kale, jinsi ahaan oo isticmaalo, laga ganacsado, isaga ama qaraabadiisa lacag looga qaato, sidoo kale loo gala baxo xubno ka mid ah jidhkiisa.

**Qodobka 1aad** xarafka "d" in qof u nugul sifo da' ahaaneed, caafimaad, naafo'nimo, kinsi, baadi, haysa cabsi ama aqoon darro, si khaldan looga kaxaysto meeshii u joogay ama uu deganaa, u jeedo la mid ah ama si ka duwan kuwa farqada 1aad ee Qodobkan ku cad.

**Qodobka 3aad** u jeedada xeerkani waa inuu noqdaa habraaca ka hortaga wax ka qabashada Tahriibka iyo ciqaabista dadka Tahriibaya. Dadka dadka tahriibiya, gaar ahaan kuwa thariibiya dumarka iyo carruurta, si waafaqasan xeerka loo yaqaano (United nation convention against transit national or organized crimes), oo macnihiisu yahay xeerka qaramada midoobay ee la xidhiidha dembiyada ka dhaca dadka xuduusaha isaga

gudba. Iyagoo ah dembiyo abaaulan, iyadda oo lagu xad-gudbayn Qodobka (Geneva Convention agreement for human rights and protocol) oo ahaa 1967 Un protocol, iyadda oo loo raacayo xeerka ciqaabta guud, iyadda oo lala eegayo shareecada islamka oo ilaalisa xuquuqda carruurta, dumarka iyo dadka nugul iyo bani'aadamka oo dhan.

**Qodobka 6aad** dembiyada ka ganacsiga dadka. Waxaan sheeg in Tahriibkuun lagu caddeeyo, waayo ka ganacsigu gudaha ayuu ku jira.

Dembiyada ka ganacsiga dadka **farqada 3aad** Muddada ciqaabta ee ah 10 ilaa 20 sanno**, waxaan soo jeedin lahaa in la talin shareeco laga yeesho, iyaddoo haddana la eegayo xuquuqda aadamaha.**

Waayo shareecadeenu ma ogola in qofna lagu xad-gudbo ama la dulmiyo. Had iyo jeerna waxa looo gaysanayaa waa inay u dhigmaan wixii uu gaystay oo aanay noqon wax ka baxsan.

**Qodobka 7aad gacansiinta ama gargaarida ka ganacsiga dadka, waxaan ku beddeli lahaa gacansiinta Tahriibka.**

Meel kasta oo ay ku jirto ka **ganacsiga dadka,** waxaan ku beddeli lahaa **Tahriib.** Faqrada 5aad 5 ilaa 10 sanno oo xadhig ah, **waxaan soo jedinayaa la tashi dhanka shareecada ah laga yeesho,** yeynaan ku go'aaminin inaga oo aan la tashan shareecada.

**Qodobka 8aad** kalmada **"culaysiin"** waxaan ku beddelayaa **"culaysin".** Sida qabyo qoraalka ku qoran oo lala akhriyey ama lala eegay xeerka ciqaabta guud, sharceeada Islamka iyo xeerarka caalamiga ah ee arrintan khuseeya si (International human traffic law and regional acts) oo ah xeerarka iyo heshiisyada ay galaan Gobolada ama waddamada isku dhaw dhaw.

**Farqada 2aad** Xaalada culaysin ee ciqaabta waxa loo raacayaa sida farqada 1aad tilmaamtay.

**Qodobka 9aad:** Dembiyada Tahriibka (Human Traffic crimes). Waxaan baraajinayaa Guddoomiye dadku innay halkan fahmaan oo tahriibka laga hadlayaa tahay marka qof ama dad ay kaxeeyaan qof kale ama dad kale oo si shakhsi ah loo waddo. Sida ku qoran qabyo qoraalkan xeerkan ee ku qoran **Qodobka 8aad faqradiisa 1aad**, sida aan u akhriyey sida Guddidu u dhigtay waxaan ka beddeli lahaa Qodob odhanaya **"wixii ciqaab la xidhiidha waa in la xaqiijiyaa inuu waafaqsan yahay xeerka caalamiga ah ee tahriicka dadka, gaar ahaan shareecada Islamka"** si aanay marnaba u dhicin in eedeysanaha ama eedeysanayaasha lagu xukumo ciqaab dulmi ku ah, sida xadhig, ganaax, hantidiisa oo lala wareego ama ciqaabta lehg, taasi oo ka soo horjeeda xeerarka caalamiga ah ama sida ugu muhiimsan ee shareecadu diintan tahay sidaas.

Ganaaxa shareecada ayaa diiday, balse waxaan ku beddelayaa "Magdhaw" u dhigma dhibta dhaqaale, sharafeed, ama nafeed ee dembiilaha ama dembiilayaasha ay gaystaan ama uu gaystay.

**Qodobka 11aad:** waxaan u dhigi lahaa xukun ciqaabeed kasta waa in la hubiyo inuu waafaqsan yahay xeerka caalamiga ah ee Tahriibka iyo shareecada Islamka.

**Qodobka 3aad:** dembiyadu maaha sida ku qoran qoraalada kale ee la xidhiidha iyo ka ganacsiga dadka.

**Qodobka 18aad:** ka baaqsashada sheegida xogta, waxaan ku beddeli lahaa "soo sheegista xogta" qof kasta oo hela xog ama caddeyn ku saabsan qof kasta oo hela xog ama caddeyn ku saabsan fal-dambiyeedyada ku xusan xeerkan oo soo wargeliya hay'adaha nabadgelyada si looga hortago dhicista falka, ama si looga dabatago si loo badbaadiyey dhibane ama dhumabayaasha loo qabto dembiile ama dembiilayaasha, waxay xaq u yeelanayaan abaalmarin maaliyadeed ama abaalmarin kale oo macnawiya, sida bilad sharafeed.

**Guddoomiye dadka la tahriibiyaa waxay u badan yihiin carruur iyo dumar.** Shareecadu waxay dhigaysaa dumarka iyo carruurta in laga masuul yahay, in halkaa la tashi laga yeesho. Waalidiinta iyo dadka ka masuulka carruurta si weyn dawladu ugu wacyigeliso inay waajib ku tahay inay la soo socodsiiyaan marka ay waayaan carruurtooda ama qod dumar ah ama dhalinyaro ah la waayo in lala soo socod siiyo hay'adaha nabadgelyada, hay'adaha nabadgelyaduna la xidhiidhaan dhammaan waddamada iyo meelaha kale ee loo tuhmayo oo la isticmaalo sharciga caalamiga ah (Human Traffic protocol). Aad baad u mahadsan tihiin Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

**Md. Sh. Ahmed dayib Aadam (6min, 31sec):-** Bismilaahi Raxmaani **Raxiim,** mudane guddoomiye iyo mudanayaal kolay xeerkan markaan akhriyey dhowr mulaxadood baa iga muuqday iyo xaga qoraalka typing error badan baa kujira xaga hab qoraalka waxbadaan baa kujira, **Qodobka 6aad farqadiisa 1aad** oo keliya 15 ama, ama baa kujirta intii la adeegsan lahaa waxyaalo kale marka qoladii af somaliga intaan loo codayn waxaan codsanayaa in loo gudbiyo si ay usoo saxaan.

Xaga erey bixinta erey bixin baa kujirta xeerka intaan akhriyey laba jeer aanan ku arag oo ah ka ganacsiga galmada qof kale, kalmadaasi xeerka kuma jiro, iyada oo ciqaabteeda laga hadlayo hadana xeerka kuma soo aroorin. **Markaa waxaan soo jeedinayaa in laga saaro erey bixintaas xeerka erey bixinta kusoo waayo waxa uu galayaa Xeerkii kufsiga iyo hawla kale ayuu gelaya marka in laga saaro ayaan soo jeedin lahaa.**

**Qodobka 4aad farqadiisa 1aad** oo ka waramaysa xadka dabaqaada xeerka farqada kowaad ee ugu damaysa ee xuduuda dalka jamhuuriyada Somaliland ka kooban tahay

intaasan bedelayaa waxaan kubedeli laha oo soojeedinayaa in lugu bedelo **xuduuda dalka jamhuuriyada Somaliland la leeyahay dalalka.**

**Qodobka 13aad farqadiisa 3aad** oo ka waramaysa ciqaabaadka waxay utaala ciqaabta waxaa lala akhriyayaa qodobka 37aad ee xeerka socdaalka jamhuuriyada Somaliland iyo qodobada ciqaabta ah ee xeerka ciqaabta guud waxaan soojeedinayaa nuxurka qodobadaa inaan loo ixaalayn ee halkan looso guuriyo

**Qodobka 15aad** wuxuu u yeela sidan hadii fal dambiyeedka ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta dadka ee ku xusan xeerka uu ku keeno dhibanaha dhaawac halis ah ama dhimasho eedaysanaha lagu helay denbigaasi waxaa lagu xukumayaa xabsi daa'in ama dil kolba siduu denbigaasi yahay *halkaa waxaan soojeedinayaa dee dhaawacyadu ciqaabta iyadoo aan laga saamaxaynin dhaawacyadu mag bay leeyihiin dee dhimasho haday timadona qisaas baa imaanaysa in markaa lagu cadeeyo ciqaabka uu mudanayo xabsi daainka laga dhimo oo 5-10 sano laga dhigo ciqaabkiisa wixii dhaawac uu geystay iyo dhimashaba loo raaco axkaamka shareecada islaamka.*

**Qodobka 16aad farqadiisa 1aad** la wareegida hantida fal denbiyeed iyada oo u dhigan farqada 1aad; marka laga yimaado ciqaabkasta oo lagu sheegay xeerkan iyo xeer kale gudihiisa maxkamadu waxay awood u leedahay inay amarto in lala wareego dhamaan iyo faa'idooyinka laga dheefo fal denbiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka **waxaan soojeedin lahaa halkaas awood u leedahay in aan la odhane in la waajibiyo oo qofki waxaa geystay inay maxkamadu la wareegto taasna wan soojeedin lahaaa**

**Qodobka 22$^{aad}$ farqadiisa 2$^{aad}$** iyadoo aan waxba loo dhimayn farqada1aad ee qodobkan hadii uu dhibanuhu dhinto ama uu soo gaaro dhaawac halisa ama ay ku keento xanuun aan dawa lahayn eedaysanaha laga saamiximaayo ciqaabta balse iyada oo laqiimaynayo doorkiisa ka qayb qaadashada denbi iyo muhiimada cadaynta uu bixiyey waa laga dhimikaraa, **dhimasha iyo dhaawac haday yimaadaan iyadana in shareecada loo raaco qisaastana laga saamiximaayo wixii dhaawaca wixii magdhow ah in laga qaadaa ayaan soojeedinaya oo loo daayo shareecada islaamaka**

**Md. Aadan Cismaan Xarbi (2min, 08sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim mudane guddoomiye iyo mudanayaal waan idin salamaya marka hore anu in yaroo kooban ayaan kudarayaa qodobadi ay ku soo dareen gudigu oo aan aad u badnayn qodobkasta isagoo xardhig leh hadana ganaax xaga dame laga raaciyey dadkan inta badan hawsha loo qadayo waxay noqon karaan dad ajnebi ah ama nooc walba leh **waxaan soojeedin lahaa in laga saaro qodobada, qodobka 6aad, 7aad waxaan kaloo ku darilaha oo uu ganaaxu kujiraa qodobka 19aad oo ganaax kujiro oo isna xadhig loogu bedelo.**

Waxaa kale oo iyana gudigu kusoo dartay xeer 75aad oo xeerka ciqaabta guud ku qoran waxa uu xeerkaasi inoo dabaqayo ama waxa uu qorayo halkan kuma hayno marka waxaan jeclan lahayn in xeerka laftigiisa lasoo dabaqo dabadeed markaa la ogaado

xeerka waxa uu sheegayo si aynu u ogaano xeerku waxa uu yahay dabadeed aynu markaa ugu go;aan qaadano

**Md. Nuuradiin Axmed Dayib** **(5min, 33sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda, Mudanayaasha Golaha, Shaqaala weynaha waxaan kusalamayaa Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakatu.

Bacda salaam kuma dheeranayo laba Qodob baandul istaagidoona erey bixinta xeerka halkan waxaa ku taala ka ganacsiga markaa ka ganacsiga waxaa soo hoos gelaya dhowr su'aalood oo is weydiin mudan ka ganacsiga ma waxaa qofku ka ganacsanayaa xubniihii muhiimka ahaa sida kelyaha oo kale, ma afduub buu dadkii ugu ganacsan ma sida tahriibka buu uga ganacsan sida qolyahan magafayaasha oo kale bay ku shaqaysanayaan taasi waa qodob hadii ay tahay in qofku ama shakhsigu uu samaynayo in uu qofki bini'adamka ahaa xubnihisi muhiimka ahaa ka ganacsado taas shareecada islaamka ayaa loo raacaya  waana dil hadii qofkaasi dhinto, hadii uu nooladana intuu ugeystay in leeg baa loo samayn keli haduu kala baxay isna keli baa looga sarayaa.

Tan kale waxaa weeye hadii uu qofku samaynayo tahriibin iyo qaabka magafayaasha ushaqaysanaya ama nimanka budhcadka ee dadka kexeeya waxyaalaha la yaabka leh waxaa weeye waxaa jira gobolada Somaliland gobol aanay ka shaqayn qolyahan tahriibiya dadku majiro waa magafayaal soconaya  tusaale wiilal yar yar oo dhalinyara ah  baa hada ka hor waxay kaso tageen waa dadkan school kujira xaafada ahayeen nimankasi way soo tageen Dabcan nimanka markaan ogaanay meelo badan baan waxaaan dhignay waxa layiraahdo check point oo kubalaminay meelkasta ay marayaan wa loo fududaynayey  markaa waxaa weeye koox sil-silada oo isku xidhan oo Gobol kasta jooga sidaa darteed qofka waxyaalaha noocasa oo kale ku kacaya inta laqabto waa in talaaba sharciga waafaqsan laga qaado hadii qodobkaasi ku cadaadana xukun ciqaabeedkeeda iyo waxa uu mudanyahay la mariyo. oo ugu yaraan waxaa qabaa si uu uga waantoobo hadii maanta inta laxiro oo lasoo daayo beri na hawshii waaku kacayaa.

*Markaa waxaan qabaa qofki lagu qabto inuu qof muwaadina tahriibinayo in la deldelo qool in madaxa loogu rido waayo waxaa la rabaa in waxan laga waantoobo oo aanu beri ka maalin unoqon, Waayo wa dad soo koroya waa dad soo kobcaya marka kaa soo kale waa danbiile waana in la deldelaa.*

**Waxaan kaloo soojeedin lahaa xaga xuduudaha in la ilaaliyo si waafaqsan qaabka loo ilaaliyo xuduudaha taxadarkeedu noqodo taxadar ka baxsan sida amniyaadka kale oo gaar loo ilaaliyo dadku haday kabaxaan** dalka **yaaku noolanaya, qodobka waxaan rabaa inaan aad ugu celceliyo in laga fekero ama soojeedinayaa cida masuuliyadeeda leh aan usoo jeedinayaa in xuduudaha aan la wadaagno wadamada aan jaarka nahaay**

**sida somalia, jabuuti iyo Ethiopia in xuduudahoda aad loo sugo qofku markuu ka baxayo sharci kaga baxa markuso gelayona sharci kuso galaa**

**Md Cabdihakiim Hugur Cabdi** **(2min, 23sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim mahadsanid mudane guddoomiye shirgudoonka Golaha wakiiladda, xildhibaanada golaha, shaqaalaha golaha, saxaafada, iyo marti sharafta Salaamu calaykum waraxmatu'laahi wabarakatu intaa kadib anuu waxaan doonayaa inaan saddex qodob is dultaago.

Runtii waxaan u mahadnaqayaa qoladii Guddiga ahayd ee kasoo shaqaysay wakhti badana gelisay hadana bini'adamka wixiisu boqolkiiba boqol sax maahayn ta Alle ayaa sax ah kolay dhaliil waad yeelanaysaa ama waxbaa la tebayaa **Qodobka 9aad** ciqaabta ka dhalanaysa waxa laga dhigay 5-10 ciqaabkiisa ganaaxiisana shan iyo toban milyan halkaa ***waxaan soojeedin in ilaa labaatan milyan laga dhigo***.

**Qodobka 11aad** isaga laftiisa 2, 3 oo xariga iyo saddex Kun oo dollar halkaa waxaan dhan lahaa madama xarigu Kara duwan yahay in laga dhigo laba kun oo dollar

**Qodobka 13aad** wuxu odhan 3 sano ilaa 5 sano lacagta lagu ganaaxay waa ilaa shan milyan waxaan odhan lahaa 5 ilaa 10 milyan, intaa waxaa iraaca gadiidka ay dawladu leedahay ee hawsha lagu helo mudanayaashii yiri wasaarad kale halo wareejiyo waxay ilatahay hadii wasarad wasaarad kale looga wareejiyo inaanay ciqaab ahayn oo waysla dawladii marka waxaan soojeedinayaa in dareewalka wada lagu xukumo xarig ah 15 sanadood.

**Md. Mubaarak Muuse Ismaaciil** **(5min, 40sec):-** Marka hore waan salamaya mudanayaasha, Guddoomiyaha, shaqaalaha golaha iyo saxaafada ba waxaan marka ugu horaysa ka hadlayaa waa qodobka 5aad ee dabaqaada ka baxsan xad dhuleedka Somaliland qodobkaasi wuxu sheegaya iyadoo aan la xadaynayn qodobada 7aad iyo 8aad ee xeerka ciqaabta guud xeerkan waxaa lagu dabaqayaa fal denbiyeed kasta oo ku xusan xeerkan oo lagu galay meel ka baxsan xad dhuleedka Somaliland markuu qofku yahay muwaadina somaliland udhashay, markuu qofku yahay denbiga geystay ama kan denbiga laga geystay ama qof degaansho leh Somaliland.

Qodobkan runtii waxaan u arkay qodob kayar baxsan runtii ciqaabka xadka somaliland ee qofka lagu ciqaabi karo waxaan u arkaa mar hadii qofku denbiga ka galay meel ka baxsan somaliland aan denbi ciqaabeed tahriiba laguso oogi karayn sababto ah marka ugu horaysa qofku xuduudeena wuu ka baxsanyahoo siduu denbigaa ugalay soo qabashadiisa iyo xidhistiisa dawlad kale ama hay'ad kale oo inaga inaga baxsan baa shuqul kuleh si ay hawshaa uso fuliyeena ma garanayno qofka inay denbi saxa kuso ogeena lama garanayo tan labaad inaga mar hadaanay jirin wadamo ay inaga dhexeyaan

xaga baadhis wadaaga oo aan wadanba kan kale la wadagayn sida denbiga loo baadhayo oo aynu awood u lahayn inaynu meesha tagno oo qofka denbiga laguso rogay wadanka xidhiidh ama heshiis  caalamiya aanu inaga dhaxayn.

**Waxaan soo jeedinayaa qodobka in dib looga fiirsado ama gebi ahaan ba meesha laga saaro xeerka   ama gudigu ay waxka bedel ku samayso**

**Qodobka 16aad** eeka hadlaya la wareegida hantida faldanbiyeedka qodobkan wuxuu dhigayaa in wixii hanti ah ama faaidooyin laga dheefo fal denbi yeedka xeerka ka ganacsiga iyo tahriibka dadka in lala wareegi karo taas waxaan kuso kordhino lahaa mar hadii aan la garanayn wax dheefa ama faaidooyin oo markaa qofka aan lagu qaban ama lacag markaa ha noqoto ama hanti ha noqoto lakin in lagu daro wixii markaa lagu qabto qofka ama ha ahaado gadiid ama ha ahaado gurigii markaa lagu ururinayey dadkaa tahriibayasha ah in wax ale wixii faldanbiyeedka ku saabsan ee hanti ah lala wareegi karo intaasan soojeedin lahaa in lagu daro.

**Qodobka 22aad** dhimista ciqaabta qodobkaasi waxa weeye qofkasta oo lug ku yeesha denbiga ganacsiga iyo tahriibinta dadka in denbiga ama ciqaabta laga dhimikaro qodobka waxaan ku dari lahaa qofka laga dhimikaraa waa inuu ahaa qof aan horay denbi ama xabsi hore wadanka uga gelin waa inuu ahaada qof aan horay denbi gaa tahriibta laguso oogin lakin qofkaasi haduu yahay qof mar walba ka ganacsado oo dhawr jeer oo hore lasoo xidhay in markaa ciqaab dhimis lagu sameeyo waxaan u arkaa in arintaasi arin ka baxsan tahay markaa in lagu daro markaa qofka aan denbigaa hore ugelin ba ciqaab dhimis lagu samaynkaraa , qodobka laftiisa 22aad farqadiisa 3aad  cadayn muhiima kelmadaa cadayn muhiima runtii waxaan u arkaa in xeerku si uqayixin waxyaalaha cadaymaha muhiimka ah ,cadaymaha muhiimka waxaa loo baahna yahay in si toosa loo qayaxo cadaymahasi ma documents ba ma waxaa weeye xog  tusaale ma xog qof laga duubay oo la dhegaystay markaa **waxaan soojeedin in arintaana runtii ay gudigu si toosa ucadeeyaan cadaymaha muhiimka ah si aanay u noqon  hadal- hadal qof kale ku yiri ama qof kale oo markhaati keensaday u noqon cadayn muhiima   waa in si toosa loo qayaxaa wax documents oo evidence  waa inay noqoto cadaymahasi**

**Md. Khadar Cali Xakiin** ***(3min 50sec):-*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, mudane Gudoomiyaha iyo mudanayaal waad salaamantihiin, laba soo-jeedimood oo yar-yar ayaan soo-jeedinlahaa, Waxaanan ku horaynayaa Macaga xeerka waxaanan soo jeedinayaa in laga dhigo Xeerka ka hortaga iyo Xakamayta tahriibinta dadka. Waxaanan ka saari lahaa ka ganacsiga waxaanan laqabaa xildhibaan Nuuradiin waayo waa mawduuc balaadhan.

Xaga eraybixinta waxaa soo galaysa ka ganacsiga jidhka oo loola jeedo galmo oo kale, kaganasigu wuu gudo balaadhanyahay, oo waxaa ku jiraya kaganacsiga jidhka dadka,

oo kaasi waxa uu inooga baahanyahay *Xeer gaar ah aadna u faah-faahsan taas waan soo jeedin lahaa.*

Ujeedooyinka qodobka 3aad waxa uu ku taxaluqaa ilaalinta tahriibka, maadaama oo tahriibka oo dhan loo jeedo waxaan soo jeedin lahaa in qadobkaa laga saaro ama si kale loo dhigo.

Soo-jeedinta 2aad xeerkan marka afka qalaad loo eego waxaa loogu yeedhaa human trafficking, taas oo la xidhiidha human rights-ka ama xuquuqda bili- Aadanka anaga oo guddidaa xeerka gacanta ku haysay oo aanu ku ixtiraamnay, oo markii aanu waraysanayna nagu yidhi xeerkani wuu idinka horeeyay oo golihii hore ayaa soo gudbisay, xeekan waxaa soo gubisay Wasaarada Cadaalada oo aanu line-ministry la ah Guddida Cadaaladda, sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in xeerarka la eego xida ay ku socoto si loogu wareejiyo, iyada xeerkaa sida lanoo sheegay ama sabata Guddidaa loo gu dhiibay laga eegay dhanka amaanka.

Ugu danbayn waxaan Soo-jeedinayaa asalka Tahriibku ama ka faa'idaysiga bili aadanka in laga ganacsadaa waa arrin ku saabsan xuquuqal insaan waana arrin ku saabsan dhaqaale xumo keento, waxaanan soo jeedinyaa in dhaqaalaha wadanka la kobciyo, lana abuuro fursado shaqo.

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac** ***(1min 13sec***):-Mahadsanid guddoomiye kolay anigu waxan odhan lahaa, markaad akhrido xeerkan waxa kujira afsomali ahaan. Kelmado badan oo sidaa shiikhu sheegay soo noq noqonaya, marka xeerku marka uu inaga baxayana waxa fiican inuu ahaado xeer cad, umuuqdo loona akhriyi karo inuu yahay.

Marka kelmado badan oo soo noq noqo naya ayaad arkaysaa, markaan waxan odhan lahaa kelmadahaa hala saxo, qolada afsoomaliga inoo qaabilsan haloo geeyo oo English kujirta halaga saaro iyo kelmadahan so noqnoqonaya.

*Marka waxan soo jee-din lahaa in kelmadahaa soo noq noqonaya laga saaro oo lasaxo.*

**Md. Cabdikariin Maxamed Muxumed** ***(3min 22sec):-*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiyaha, Ku-xigeenada iyo dhammaan Xildhibaanada marka hore waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka ASC. Ugu horayn waxaan u mahad-naqayaa Guddidii dib u eegista ku samaysay Xeerkan soona diyaarisay ee Guddida Arrimaha Gudaha, Difaac, Aniga iyo Nabadgelyada ee Golaha wakiilada iyaga oo lifaaqana soo raaciyay, wax badana ay ku soo kabeen

Si guud hadii aan u gudo galo xeerka, waxaanu jeclaha in aan 2-ba ama 3 qodob kaga hadlo xeerkan ay guddigu Golaha horkeentay, Qodobka 1aad ee Ciwaanka Xeerka waxaan soo jeedinlahaa halka ay ku qorantahay ka ganasiga dadka aynu dib-u-eegis ku samayno waxaanan la qabaa mudanayaashii iga horeeyay loona dhigo *Xeerka ka-hortaga iyo xakamaynta Tahriinba dadka.*

*Qodobka ka hadlaya ganaaxyada iyo xadhiga ee ay guddidu soo raacisay waxaanu odhan lahaa dadka hawlahan ka shaqeeyay lacagahaasi way u fufudahay in ay iska bixiyaan markaa waxaanu soo jeedinlahaa in laga saaro, oo lagu daayo xadhiga.*

**Qodobka 9aad farqadiisa 2aad** oo ah qofkasta oo lagu helo denbi sida ku xusan farqada 1aad, ee qodobkan waxa lagu ciqaabayaa xabsi udhexeeya 5sano ilaa 10sano oo xadhiga. Marka sil-siladani qofba meel buu kasoo gelayaa, qofbaa laga yaabaa in ay ku soo ururayso, lakiin waxaa jira dad badan oo si uun arrinta soo galaya.

Markaa in xadhiga 2sano ilaa 10sano ay maxkamaduhu u eegaan waxa role-kiisu yahay ay u eegaan. Lakiin waxaa laga yaabaa qof arrinka si fudud u soo galay in 5sanno ama 6sanno oo xadhig ah lagu xukumo, markaa waa in loo eegaa danbiga uu galay sida uu yahay.

**Si guud waxaanu u soo-jeedinayaa;**

- ✓ Xeerka ka-hortaga iyo xakamaynta Tahriinba dadka.
- ✓ Inaan xadhigga la iibsan karin Saamaxna aanu lahay.
- ✓ In aan hantida qofka lala wareegi karrin, wareego waxay dhalinasaa isku dhac, sidaa darteed waxa lagu xakamayn karaa xadhig aan saamax iyo iib midna lahayn.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada**
__________________________________

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
______________________________